Qorshaha Baadhitaanka Xarunta Daryeelka Muddada Dheer

Juun 12, 2020

Oregon Health Authority

Asalka

Kalkaalinta, daryeelka deegaanka, iyo xarumaha deegaanka ee la taakuleeyo, ee wadajirka ahaan loogu yeero xarumaha daryeelka muddada-dheer (LTCF) waxay khatar weyn ugu jiraan faafidda COVID-19 sababtuna tahay qaab isku-raran kooga iyo dadka nugul (tusaale ahaan, dadka waayeelka ah ee qaba cuduro badan). Xeeladda asaasi ah oo lagu yareynayo suurtagalnimada iyo darnaanta ku faafitaanka gudaha LTCFs ayaa ah baadhitaanka deganayaasha iyo shaqaalaha labadaba.[1]

Oregon hadda waxay leedahay 685 LTCFs oo uu shatiyeeyay barnaamijka Dadka Da'da iyo Naafada ah (APD) ee Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (DHS). Xarumahan ayaa hoy u ah 31,000 oo deganeyaal waxayna shaqaaleeyaan ilaa 29,000 oo shaqaale ah - ku dhawaad 60,000 dhamaantood.[2]Ilaa maanta, inta ugu badan ee xarumahaasi ma aysan yeelan shaqaale ama degane laga helay COVID-19.

Ujeeddooyinka Qorshe

1. Marka la gaaro Sebtember 30th, 2020, hubi in dhammaan deganeyaasha iyo shaqaalaha dhammaan 685-ta xarun ee kalkaalin, deegaanka daryeel, iyo xarumaha deegaanka ee la taakuleeyo ee ay shatiyaysay barnaamijka Dadka Da'da iyo Naafada ah (APD) ee Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon loo fidiyay baadhitaanka fayraska COVID. -19 ugu yaraan hal mar. Ujeedooyinka qorshahan awgeed, xarumahaan waxaa si wada jir ah loogu yeeraa xarumaha daryeelka muddada-dheer (LTCF).
2. 30 maalmood gudahood marka la dhammaystiro baadhitaanka aasaasiga ah ee lagu qeexay Ujeeddada Qorshaha 1, Bilow xeelad baadhitaan ah oo socota oo ay kujirto baadhitaan qasab ah oo 25% shaqaalaha ah toddobadii maalmoodba si 100% loo baadho bil kasta muddada cudurka faafayo.

Malooyinka Qorshaha

- Marka la eego caqabadaha joogtada ah ee ku saabsan helitaanka saadka baadhitaanka, OHA waxay qiyaaseysaa in hay'adaha baadhitaanada u adeegayo gobolka inay si wada jir ah u xajin karaan heerka lagu kalsoonaan karo oo ah 17,000 baadhitaan todobaadkii (fiiri qaybta hoose ee Xaddiga Baadhitaanka).
- Marka loo eego Qorshaha Xeeladda Baadhitaanka COVID-19 ee Oregon ee Maamulka Caafimaadka ee Oregon[3], Oregon waxay u baahan doontaa inay sameeyso qiyaastii 12,500 baadhitaan todobaadkii si loo daboolo baahiyaha baadhitaanka gobolka ee aan ahayn kuwa LTCF.
- Wareega koowaad ee baadhitaanka buuxa wuxuu bilaaban doonaa Juun 24-teeda, 2020 wuuna dhameystirmi doonaa Sebtember 30-keeda, 2020.
- 685 xarumood ayaa ka kooban ilaa 31,000 degane iyo 29,000 shaqaale. In kasta oo qaar ka mid ah dadkaas mar hore la baadhay, wareegga koowaad ee baadhitaaka buuxa wuxuu u baahan doonaa 60,000 baadhitaan.
- Xarumaha badankood waxay leeyihiin ama yeelan doonaan xaddi ay ku sameeyaan baadhitaanno waxayna mas'uul

---

1 Guryaha xanaanada dadka waaweyn waxaa dagan dadka sidoo kale nugul. Si kastaba ha noqotee, goobaha sida qoysaska ah ee inta badan yar lehna ugu badnaaan mug shan qof ah lama aynan kulmin qaar badan oo caqabadaha ka hortagga iyo xakameynta caabuqa ee ay wajaheen LTCFs. Waqtigaan la joogo, kaliya 7 ee ku dhawaad 1,400 (.5%) ee guryaha dadka waaweyn ee xanaanaynta ayaa leh dagane ama shaqaale qaba COVID-19. Qaadidda oo hoosayso awgeed, APD kuma talineyso xeelad baadhitaan ee loogu talagalay guryaha dadka waaweyn lagu xanaaneeyo haatan. Kheyraadka yar waa in loo weeciyaa meelaha kale ee uu cudurku ka dillaacay.

2 Ka sokow xarumaha shatiyaysan, Oregon wuxuu kaloo leedahay hoy kale ee dadka waaweyn ee aan shatiyaysneen oo badan oo kuwaas oo hoy u ah waayeelada iyo qaan-gaarada naafada ah lana kulma isla caqabadaha ka hortagga iyo xakameynta caabuqa. Tusaale waxaa ka mid ah guryaha dabaqyada waayeelada, oo badanaa loo yaqaan bulshooyinka nolosha u madaxbannaan. Majirto hay'ad dawladeed oo waqtigan shatiyayso ama si kale u raad-raacdo xarumahan.

3 https://sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served//LE2356.pdf

ka noqon doonaan sameynta iyo bixinta qarashka baadhitaanada, iyadoo looga helayo caawimaad OHA sida loogu baahdo si loo helo saad loona buuxiyo nusqaamaha xaddiga.

Marka lagu saleeyo malooyinkaan, baadhitaanda asaasiga ah ee dhammaan LTCF-yada waxay dhammaan doonaan Sebteember 2020. haddii loo qaato in tirada saadka baadhitaan ee la heli karo aanu is beddelin, dadaal kasta oo lagu dhammaystirayo xeeladan baadhitaan waqti sii yar gudaheed waxay sababi doontaa in baadhitaanada ka yaraadaan mudnaanta baadhitaanada kale ee Oregon, oo ay kujirto kordhinta baadhitaanada dadka kale ee sida aan isku-dheeli tirnayn u saameeysay masiibada. Dadkan waxaa ka mid ah dhamaan bulshooyinka Isbaanishka ee Oregon iyo kuwa aan cadaanka ahayn, iyo sidoo kale dadka naafada ah iyo shaqaalaha adeegga safka hore.

Shaxda 1. Doorarka iyo Mas'uuliyadaha baadhitaanada LTCF	
Shuraako	**Doorarka iyo Mas'uuliyadaha**
xarumaha LTC	• Dalbo baaritaannada haddii ay suurtagal tahay • Ku wargeli natiijooyinka baadhitaanka LPHAs iyo APD • Samee oo hirgeli qorshaha kormeerka joogtada ah ee shaqaalaha iyo deggeneyaasha, oo ay kujirto baadhitaanka qasabka ah ee dhammaan shaqaalaha 7dii maalmoodba mar si 100% loo baadho bil kasta. Tan waxaa ku jira shaqaalaha dhammaan xarumaha iyo dhammaan shaqo-wareegyada. • Ka caawi raad-raacidda taabashada iyo hubinta ku-laabashada habboon ee shaqada iyo dhaqammada gooni-yeelidda ee looga jawaabayo baadhitaan togan • Bixi aqoonta hab-maamuska baadhitaanka iyo xakamaynta caabuqa shaqaalaha xarunta, deganayaasha, iyo qoysaska • Joogtee heshiisyada lala galo sheybaarada si loo sameeyo baadhitaanda kormeerka joogtada ah ee HCP. • Hubso adeegsiga hab-raaca baadhitaanka ee dhaqan ahaan habboon, argagaxana la tacaasho • La wadaag macluumaadka ku saabsan baadhitaanka deganayaasha, shaqaalaha, iyo daneeyayaasha • Dabool kharashaadka ku baxa baadhitaanka socda ka dib bilowga wareega koowaad ee baadhitaanka buuxa uu soo gabagaboobo
Xarumaha caafimaad, tacliimeed, iyo sheybaarada ganacsi ee heer gobol	• Xaji heer shahaadada CLIA isla markaana isticmaal Adeegsiga Deg-degga ee FDA ay sharciyaysay ee baadhitaanka molekuyuulka COVID-19 ee helidda SARS-CoV-2 RNA • Bixi saadka muunad uruurinta loo baahan yahay • Natiijo celin baaritaan 48 saacadood gudahood helitaan ka dib
Maamulka Caafimaadka Dadweynaha ee Maxaliga (LPHA)	• Taageer dadaallada baadhitaanada xarunta • Ku wargeli natiijooyinka baaritaanka xarunta OHA • Hogaami baadhitaanka kiiska iyo raad-raaicidda taabashada baadhitaanada togan • Taageer adeegsiga hab-raaca baadhitaanka ee dhaqan ahaan habboon, argagaxana la tacaasho • U dalab baadhitaanada xarumaha aan sidaas sameyn karin

Shaxda 1. Doorarka iyo Mas'uuliyadaha baadhitaanada LTCF	
Shuraako	**Doorarka iyo Mas'uuliyadaha**
Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA)	• La shaqee LPHAs si la iskuguduwo saadka baadhitaanka • Kala shaqee DHS daboolidda dhammaan kharashyada baadhitaanka een la-celin karin ee wareegga koowaad ee baadhitaanka buuxa • Buuxi nusqaamada xaddiga xarumaha baadhitaanka • Isu-du' dadaalada baadhitaanka xarunta si loo waafajiyo ujeedooyinka qorshaha • Raad-raac oo la soco dadaalada baadhitaanka xarunta • La shaqee LPHAs si loo bixiyo hagista hab-maamuska baadhitaanka iyo xakameynta caabuqa xarumaha • Taageer adeegsiga hab-raaca baadhitaanka ee dhaqan ahaan habboon, argagaxana la tacaasho • La shaqee SOQ iyo xarumaha si loo dhiso jadwal baadhitaan oo loogu talagalay dhammaan xarumaha laguna saleeyay halista faafitaanka COVID
Waaxda Adeegyada Aadanaha (DHS) - Xafiiska Badbaadada, Kormeerka iyo Tayada (SOQ)	• Hubso in isgaarsiin iyo hagis habboon lala wadaago dhamaan xarumaha kahor baadhitaanka. • Inta lagu gudajiro baadhitaanka, joogtee isgaarsiinta joogtada ah ee xarumaha hadba sida loogu baahdo • La shaqee OHA iyo xarumaha si loo dhiso jadwal baadhitaan oo loogu talagalay dhammaan xarumaha laguna saleeyay halista faafitaanka COVID • Taageer adeegsiga hab-raaca baadhitaanka ee dhaqan ahaan habboon, argagaxana la tacaasho • Sahmi xarumaha si loo go'aamiyo xaddiga hadda jira ee baadhitaanka iyo baahiyaha • Kala shaqee OHA daboolidda dhammaan kharashyada baadhitaanka een la-celin karin ee wareegga koowaad ee baadhitaanka buuxa
Dacwad-baaraha LTC (LTCO)	• Hubso in qorshaha iyo hab-maamuska baadhitaaka la fahmay kana caawi su'aalaha ama tabashooyinka ay soo jeediyeen xubnayaashu. • Ka caawi ka dhaadhicinta deggeneyaasha iyo qoysaska in baadhitaanka, in kasta oo si xoogan loogu dhiirrigelinayo, uu yahay ikhtiyaari. • U gudbi SOQ jawaab celin waqti habboon ah ee xaalad kasta oo la ogyahay halkaas oo xuquuqda degganeyaasha ay saameyn ku yeelan karto.
Ururada (Isbahaysiga Daryeelka Caafimaadka Oregon, LeadingAge)	• Taageer waxbarashada iyo isgaarsiinta xarumaha ku xeeran nidaamka baadhitaanka iyo sababynta mashruuca. La shuraakow SOQ si loo bixiyo waxbarasho joogta ah xubnaha xarumaha khatarta sare ee COVID-19 wali ugu jira xarumaha LTC, iyo muhiimada ay leedahay in laga sii hor tago faafid cusub oo kaste; oo ay kujirto doorka baadhitaanka dhameystiran ee lagu gaarayo tan.
Ururada shaqaalaha	• Kala shaqee SOQ dhisidda heerarka ugu hooseeya si dhammaan dhismayaasha ay u buuxiyaan shuruudo isku mid ah, iyadoo aan loo eegin heerka ururada shaqaalaha.

Xaqiijinta sinnaanta, Baadhitaanada Argagagaxa ka feejignaado iyo Tixgelinta Dhaqamada

Fahmitaanka taariikhda Oregon iyo baadhitaanada caafimaad ee bulshooyinka la fogeeyo ayaa ah aasaaska loo baahan yahay si loo hubiyo in loo sinnaado baaritaanka COVID-19 ee LTCFs. Waxaa jira kalsooni daro iyo cabsi ka dhex jirta bulshooyinka la fogeeyey oo si aynan dooneyn oo aynan ogalayn ay u arkeen iyagoo loo adeegsaday tijaabooyin caafimaad. Laga soo bilaabo aasaaskii hore ee daraasadda cudurada dumarka, ilaa Tuskegee iyo dhalmo joojinta qasabka ahayd ee Dhaladka Maraykanka, Afrikaanka Mareykanka, Haweenka Latina, iyo ah naafada. Waa inaan aqoonsanno dhaawacyadaas argagax, qaarkoodna u dhaw sida sannadihii 1970-yadii, oo aan bixinnaa tallaabooyin la taaban karo oo lagu dhisayo xiriirrada, dib loogu soo celinayo kalsoonida iyo yareynta cabsida taasoo noo oggolaan doonta inaan si dhab ah u ilaalinno caafimaadka iyo samaqabka dhammaan deggenayaasha nugul iyo kuwa la fogeeyo ee LTCFs .

Tallaabooyinka soo socda ayaa loo qaadi doonaa si loo hubiyo in baadhitaanka yahay mid dhaawac-maskaxeedka ilaaliyo dhaqamadana tixgeliyo:

- Qof kasta oo samaynayo baadhitaan wuxuu marayaa cashar ku saabsan taariikhda baadhitaanka caafimaad ee bulshooyinka la soocay.
- Dhamaan isgaarsiinta waxay ahaan doontaa waafi, U hogaansan ADA, waxaana lagu bixin doonaa luuqado aan aheyn Ingiriis, ay ku jiraan habab loogu talagalay luuqadda dagoolaha. Markay suurtagal tahay lana samayn karo, isgaarsiintu waxay imaan doontaa labo todobaad ka hor baadhitaanka si loogu ogolaado dabagal mid mid ah iyo fahamka dadka u baahan ka caawinta garashada iyo go'aan gaarista.
- Illaa iyo xadka suurtagalka ah, shaqaalaha baadhitaanka waxay ahaan doonaan kuwa ku hadla luuqado badan/dhaqammo badan si ay u dhisaan xiriirro ayna u dajiyaan deganeyaasha baadhitaanka ku socota.
- Xuquuqda deggeneyaasha iyo macluumaadka caafimaad ee la ilaaliyo ayaa la ilaalin doonaa inta hawshu socoto. Dhex dhexaadinta dhaqan ahaan habboon iyo taageerada go'aan qaadashada ayaa la heli doonaa si loogu oggolaado deggeneyaasha waqti iyo fursad ay ku fahmaan xuquuqdooda ayna ku ilaashadaan aqoonsigooda. Macluumaadka kaliya ee la siidaynayo ayaa noqon doona wadarta tirada kiisaska, dhimashada, iyo macluumaadka tirakoobka ee xarumaha cudurka ka dillaacay.
- Hawlaha iyo shaqaalaha dhexdhexaadinta waa in la aqoonsadaa lana heli karaa iyadoo la adeegsanayo qaababka wada xiriirka dhammaan deganeyaasha baadhitaanka lagu qaadayo.
- Adeegyada caafimaadka maskaxda iyo ruuxiga ee habboon dhaqan ahaan waa in la bixiyaa waqtiga baadhitaanka si deganayaasha ay ula tacaalaan dareenkooda iyo cabsidooda si ixtiraam leh oo loogu oggolaado inay wajahaan daawac-maskaxeedkoooga.
- Xarun kastaa waxay ku warbixin doontaa hab-maamuska habraaca hadii degane laga helo, iyadoo la adeegsanaayo tillaabooyinka kore ee laxiriira, u hogaansanaanta ADA, helid luqadeed iyo adeegyada caafimaadka-maskaxeed ee dhaqan ahaan habboon. Waa inay sidoo kale ku daraan habab loogu talagalay isku xirnaanta aadanaha inta uu degganaha gooni-yeelan yahay. Tan waxaa ka mid noqon kara kulanada khadka ee iPad-ka , booqashada daaqadaha ama abaabulidda adeegyo xagga diinta ah oo taleefanka ama qaabab kale lagu qabto.
- Waxaa jiri doona xeerarka kala-sooc la'aanta oo loogu talagalay shaqaalaha iyo deggeneyaasha si loo hubiyo in dhibaataynta iyo xoog-u-sheegashada aan lagu samayn degganeyaasha ka soo jeeda bulshooyinka la takooro. Tan waxaa ka mid ahaan doono khadka tooska ah iyo la tacaalidda degdegga ah ee degganayaasha la kulmay dhacdooyinkaan. Gaar ahaan, Aasiyaanka iyo Aasiyaanka Maraykanka ah waxay wajahayaan cunsurinimo sii kordheysa xilliga COVID-19 maaddaama fayraska loogu yeeray "fayraska Shiinaha". Tani waxay sidoo kale run u tahay dadka deggan LGBTQ kuwaas oo fayraska lagu xasuusto cudurka faafa ee HIV halkaasoo fayraska loogu magacdaray "fayraska khaniisiinta" taasoo dad badani ka yeeshay daryeel caafimaad ama taageero la'aan tobanaan sano.
- Iyada oo aan loo eegin natiijooyinka baadhitaanka, shaqaalaha caafimaadku waxay la socon doonaan dhammaan

degganayaasha, iyagoo adeegsanaya hababka wada xiriirka iyo ilaha kor ku xusan si ay uga jawaabaan su'aalaha dabagalka oo ay ugu xaqiijiyaan deggeneyaasha inay xuquuqdooda dhawrsoontahay lana lana ilaalinayo. Tani waa furaha wadashaqeynta sii socota.

Talaabooyinkani waxay qaadan doonaan waqti iyo khayraad sidii loo hirgalin lahaa, si kastaba ha ahaatee waa lama huraan in annagu gobol ahaan, aan aqoonsanno saameynta habraacan oo aan raadino yareynta waxyeelada ay sababi karto. Daryeel caafimaad marwalba xaq uma aynan lahayn in badan oo ka mid ah dadkaa, mana ahayn mid loo wada siman yahay.

Jadwalka Qorsheynta iyo Mudnaan siinta Xarunta

Qorshahani wuxuu leeyahay laba qaybood. Qeybta koowaad waxay diirada saareysaa sidii loo hubin lahaa in dhamaan deganayaasha iyo shaqaalaha ee LTCF-yada Oregon la baadho ugu yaraan hal jeer inta udhaxeysa Juun 1, 2020 iyo Sebteember 30, 2020. Qeybta labaad waxay hubineysaa in dhammaan LTCF-yada ay dhisaan oo ay hirgeliyaan qorshe adag oo ku saabsan kormeerka iyo baadhitaanka joogtada ah ee deggeneyaasha iyo shaqaalaha.

Jadwalka la soo jeediyay ee hoos ku xusan waxay kuxirantahay helitaanka saadka baadhitaanka oo wali aad u xaddidan toddobaadka kan xigana aad uga duwan. Intaas waxaa sii dheer, sida ku qeexan Qorshaha Baadhitaanka Xeeladeed ee COVID -19 ee OHA ee Oregon[4], mudnaanta ayaa la sii siin doonaa si looga jawaabo dhammaan dillaacyada iyo buuxinta mudnaanta kale ee baadhitaanada lagu qeexay qorshaha.

Qaybta 1: Baadhitaan Buuxa ee dhammaan Shaqaalaha iyo Degganeyaasha

Qeybta koowaad waxay ka koobantahay afar waji.

1. Wajiga 1: Hawlgelinta xarunta (6 /14-6/23)
    a. Ku wargeli faahfaahinta qorshaha xarumaha iyo shuraaakooyinka kale ee ku taxan shaxda 1.
    b. Sahmi xarumaha si loo go'aamiyo xaddiga baadhitaaka iyo dhaqamada baadhitaanka ee hada jira, aqoonso kheyraadka gaarka ah, shaqaalaha iyo baahiyaha kale ee dhameystirka baadhitaan buuxa.
    c. Samee jadwal baadhitaan, adoo mudnaanta siinayo xarumaha halista sare kuna saleysan nooca shatiga iyo goobta, iyo natiijooyinka daraasadda faafidda ee OHA.
    d. La shaqee Isuduwaha isbahaysiyada Saraakiisha Caafimaadka Deegaanka si loo hubiyo isku xirnaashaha dadaallada maxalliga ee raad-raaca taabashada.
2. Wajiga 2: Dhameystirka baadhitaanka xarumaha mudnaanta 1 iyo mudnaanta 2 marka tahay Luulyo 29-keeda, 2020
3. Wajiga 3: Dhammaystirka baadhitaanka xarumaha mudnaanta 3 iyo mudnaanta 4 markay tahay Sebteember 2, 2020
4. Wajiga 4: Dhameystirka baadhitaanka xarumaha mudnaanta 5 iyo mudnaanta 6 markay tahay Sebteember 30, 2020

Mudnaansiinta Xarunta

Xarumaha awooda inay diyaariyaan baadhitaankooga waxay awoodi doonaan inay dhammeeyaan imtixaankooda wakhti kasta. Iyadoo ay jirto xayiraadaha saadka baadhitaanka, hadana, waxaa bin loo baahan doona mudnaanta la siinayo kala horaysiinta baadhitaanka. APD waxay ku talinaysaa hab ah in mudnaanta la siiyo xarumaha ay halista ugu sareyso ee dilaaca ka jirto.

APD waxay xog aruurin ku sameysay LTCF-yada shatiyeysan ee leh deganayaal iyo shaqaale qaba COVID-19 illaa horaantii Maarso. APD waxay shati siisaa seddex nooc oo balaaran (in ka badan 5 deganeyaal ah), isku-raranka LTCF-yada: xarumaha kalkaalinta, xarumaha daryeelka deegaanka, iyo xarumaha deegaanka ee la taakuleeyo. Xarumaha kalkaalinta caafimaadku waxay bixiyaan heerarka daryeelka ugu sarreeya waxayna hoy u yihiin dadka caafimaad ahaan ugu jilicsan. Xarumaha daryeelka deegaanka, iyo xarumaha deegaanka ee la taakuleeyo waxay bixiyaan daryeel heerar hoose ah. Qaar badan oo Xarumaha Kalkaalinta iyo Daryeelka Deegaanka ah ayaa leh oggolaanshaha daryeelka Xusuusta, taas oo u oggolaaneysa inay ku bixiyaan daryeelka xusuus-waayidda (dementia) bay'ad aamin ah. Xarumaha dadka u baahan daryeelka xusuusta waxay la kulmi karaan caqabado dheeri ah oo ku saabsan ka hortagga iyo xakameynta caabuqa

4 https://sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served/le2346.pdf

sababtuna tahay dhaqankooda, baahiyaha daryeelka, iyo awooda u hoggaansanaanta tilmaamaha xakameynta caabuqa.

Ilaa hadda, xogtu waxay muujineysaa in halista ugu weyn ee dillaaca ay ku xidhan tahay xarumaha kalkaalinta. Laga bilaabo Maajo 20, 25 LTCF-yo ee shatiyeysan ayaa leh ugu yaraan hal degane ama shaqaale qaba COVID-19. Tiradaan, 12 (48%) ayaa ah xarumaha daryeelka. Labadaba tirada xarumaha leh ka dillaac firfircoon iyo saamiga qumanka xarumaha kalkaalinta ee uu ka dillaacay ee xarumaha kale ee shatiga leh ee ka dillaacay ayaan isbeddelin muddo kadib, iyada oo xarumaha kalkaalinta lagu xisaabiyo 50% ka dillaacidda ee LTCF-yada shatiyeysan in kasta oo ay ka yaryihiin 20% tirada guud ee xarumaha.[5]

Marka laga hadlayo goobta, xarumaha Multnomah, Washington, Clackamas, Yamhill, Marion iyo Polk ayaa ah tirada ugu badan ee faafidda LTCF, taasi oo tilmaamaysa in xarumaha ku yaal aagaggaa ay xilligan ugu jiraan halista ugu sarreysa ee ka dillaacidda.

Iyada lagu saleynayo xogtan, DHS iyo OHA waxay ku talinayaan mudnaan siinta baadhitaanka ku saleysan nooca xarunta iyo goobta, laga bilaabo xarumaha kalkaalinta ee Degmooyinka Multnomah, Washington, Clackamas, Yamhill, Marion iyo Polk, laguna dhammaynayo xarumaha daryeelka degaaneed iyo nolol caawineed ee qaybaha kale ee gobolka.

Iyadoo la tixraacayo talo soo jeedinta, Shaxda 3 ee hooseysa waxay mudnaanta siinaysaa LTCF-yada iyadoo lagu baadhayo nooca xarunta iyo goobta waxayna bixinaysaa waqti cayiman oo lagu dhammaystiro baadhitaanka dhammaan shaqaalaha iyo deggeneyaasha muddo 3 bilood gudahood ah.

Shaxda 2. Liistada mudnaanta leh ee LTCF-yada ee lagu baadhayo nooca xarunta iyo meesha iyo jadwalka 3-bilood ee dhameystirka baadhitaanka

Mudnaanta	Tilmaan	Tirada Dhismooyinka	Qiyaasta Deganayaasha	Qiyaasta Shaqaalaha	Wadarta Qiyaasta	Jadwalka (4,286 Baadhitaanno/ Toddobaadkii)
1	Xarumaha kalkaalinta ee ku yaal degmooyinka Multnomah, Washington, Clackamas, Yamhill, Marion iyo Polk.	71	4,708	7,075	11,783	Todobaadyada 1-3
2	Xarumaha nolol caawinta iyo daryeel deegaaneedka ee leh taageerada daryeelka xusuusta ee degmooyinka Multnomah, Washington, Clackamas, Yamhill, Marion iyo Polk.	122	4,516	3,163	7,679	Toddobaadyada 4-5
3	Xarumaha nolol caawinta iyo daryeel deegaaneedka ee aan lahayn taageerada daryeelka xusuusta ee degmooyinka	169	8,377	5,869	14,246	Toddobaadyada 6-8

5 Kaabayaasha daryeelka xoogan ee bulshada ku dhisan ee Oregon (tusaaale, deggenaanka iyo guryaynta la taakuleeyo) ayaa bixineyso macaash weyn inta lagu jiro xaaladda degdegga ah ee COVID-19. Hada waxaan leenahay 556 xarumo oo shatiyeysan ee ah nolol caawin ama daryeel deegaaneed. Tiradaan, kaliya 13 (2.3%) ayaa lala xiriirayay degane ama shaqaale qaba COVID-19. Tirakoobkan waxaa horseed u ah awoodda goobahan ay ku kala gooni-yeelayaan deganayaasha oo aan had iyo jeer suuragal ku ahayn xarumaha daryeelka.

	Multnomah, Washington, Clackamas, Yamhill, Marion iyo Polk.					
4	Dhamaan xarumaha kalkaalinta haray ee Oregon.	58	3,807	5,721	9,528	Toddobaadyada 9-10
5	Dhamaan xarumaha caawinta nolosha iyo daryeelka deegaaneed ee leh taageerada daryeelka xusuusta ee Oregon.	92	2,958	2,072	5,030	Toddobaadka 11
6	Dhamaan xarumaha caawinta nolosha iyo daryeelka deegaaneed ee aan lahayn taageerada daryeelka xusuusta ee Oregon.	173	7,215	5,056	12,271	Toddobaadyada 12-14
	Wadarta	**685**	**31,581**	**28,956**	**60,537**	

Qeybta 2: Kormeeridda Socoto ee Xarumaha Daryeelka Muddada Dheer

Qeybta labaad ee qorshaha ayaa ah hubinta la kormeeridda joogtada ah ee COVID-19 ee dhammaan LTCF-yada. Kormeerka joogtada ahi waa muhiim si looga fogaado dillaacid oo loo ilaaliyo deggeneyaasha LTCF-yada. Xarun kasta waxaa looga baahan doonaa sharci ahaan dejinta qorshe loogu talagalay baadhitaanka COVID-19 ee deggeneyaasha iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka (HCP) [6]ee lagama maarmaanka u ah ilaalinta dadkan nugul. Qorshuhu waa in la dhisaa iyadoo lala kaashanayo OHA, DHS iyo waaxyahooda caafimaadka deegaanka hal bil gudaheed dhammaystirka baadhitaan buuxa waana inay ku jiraan:

- Baadhitaan firfircoon ee dhammaan deganayaasha iyo HCP ee qandhada iyo astaamaha COVID-19 maalin kasta iyo siinta baaris deggane kasta oo qaba qandho ama muujinaya xitaa astaamo sahlan oo la jaan qaada COVID-19. HCP leh qandho ama xitaa astaamaha sahlan ee la jaanqaadayo COVID-19 waa in la baadhaa lagana joojiyaa shaqooyinka inta la sugayo natiijooyinka baadhitaankaooda. Astaamaha waxaa ka mid ah:
  - Qandho ama qarqaryo
  - Qufac
  - Neefta oo yaraato ama neefsashada oo dhib ah
  - Daal
  - Murqo ama jir xanuun
  - Madaxanuun
  - Dhandhanka ama urta oo kaa lunta
  - Cune xanuun
  - Cabur ama duuf

6 HCP waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xadidnayn, shaqaalaha adeegga gurmadka degdegga ah, kalkaaliyayaasha, kaaliyayaasha kalkaalinta, dhakhaatiirta, farsamoyaqaannada, tuujin-daaweeyayaasha, toobeyaasha, farmashiistayaasha, ardayda iyo tababartayaasha, HCP qandaraasle ah oo aynan shaqaalaysiin xarunta, iyo dadka aan toos ugu lug lahayn daryeelka bukaanka, laakiin qaadi karaa wakiilo caabuq oo lagu kala qaadi karo goobta LTCF (tusaale ahaan, karraaniga, nafaqo-taliye, bay'alayda, dhar-dhaqidda, ilaalada, maamulka, iwm.)

- Yalaalugo ama matag
- Shuban

- Deggeneyaasha laga helo oo leh calaamadaha waa in lagu gooni-yeelaa ilaa shuruudaha ku saleysan baadhitaanka la helo ama:
  - Ugu yaraan 3 maalmood ayaa ka soo wareegatay tan iyo bogsashada, oo loo qeexo qabka qandhada iyada oo aan la isticmaalin dawooyinka yareeya qandhada iyo astaamaha neef-mareenka oo hagaago (tusaale ahaan, qufac, neef yari), IYO
  - Ugu yaraan 10 maalmood ayaa dhaaftay tan iyo markii ugu horreysay ee astaamuhu muuqdeen
- Deggeneyaasha laga helay cudurka oo isla markaana leh astaamaha waa in la gooni-yeelaa ilaa inta laga gaarayo heerka qiyaasta baadhitaanka ama 10 maalmood laga bilaabo taariikhda baadhitaanka togan, haddii aysan yeelan astaamaha cudurka, marka oo gooni-yeelid lagu qiimeyay astaamaha la raacayo.

- Kormeerka joogtada ee HCP: CDC waxay soo jeedinaysaa in baaritaanka toddobaadlaha ah ee HCP iyadoo gobol dib loo furayo, laakiin waxay aqoonsan tahay in faafidda maxalliga ah tixgalinta la siinayo. Marka la eego faafidda hoose ee Oregon, LTCF kasta waxaa looga baahan doonaa inay baadhto 25% ee dhammaan HCP 7dii maalmoodba mar si 100% loo baadho bil kasta. Tan waxaa ka mid ah HCP-yada ka socda shaqo-wareegyo iyo goobo xarumood oo badan.
  - HCP-yada laga helay oo astaamaha leh waa in laga reebaa shaqada. Waxay ku noqon karaan shaqada ka dib[7]:
    - » Ugu yaraan 3 maalmood ayaa ka soo wareegatay tan iyo bogsashada, oo loo qeexo qabka qandhada iyada oo aan la isticmaalin dawooyinka yareeya qandhada iyo astaamaha neef-mareenka oo hagaago (tusaale ahaan, qufac, neef yari), IYO
    - » Ugu yaraan 10 maalmood ayaa dhaaftay tan iyo markii ugu horreysay ee astaamuhu muuqdeen
  - HCP-yada laga helay oo astaamaha leh waa in laga reebaa shaqada. Waxay ku noqon karaan shaqada ka dib[4]:
    - » Ugu yaraan 10 maalmood ayaa dhaaftay tan iyo markii ugu horreysay ee astaamuhu muuqdeen
- Baadh dhammaan xarunta HCP-yada waxaadna ka bixisaa baadhitaan dhammaan degganayaasha xarunta haddii ay jirto kiis cusub oo lagu xaqiijiyay [8]ama loo maleyn karo[9] inuu yahay COVID-19 oo ka dhex jira deggane ama HCP kasta, ka dibna dib u baadh toddobaad kasta si aad si badbaado leh iskugu cutubayso deggeneyaasha. Sii wad baadhitaanka toddobaadlaha ah illaa ugu yaraan 14 maalmood tan iyo natiijada ugu dambeysa ee tognayd.
  - Deganeyaasha laga helay cudurka oo isla markaana qaba astaamaha iyo deganeyaasha diiday baadhitaanka isla markaana qaba astaamaha waa in lagu gooni-yeelaa 10 maalmood laga bilaabo taariikhda baaritaanka togan, haddii aynan yeelan astaamo, xaaladdaa oo qiimeynta ku salaysay astaamaha ee gooni-yeelidda la raaacayo
- U soo bandhig baadhitaan dhamaan deggeneyaasha cusub kahor intaysan dagin ama dib loo dajin. Hadday baadhiitaanka laga waayo ama ay qabaan astaamaha, deggenaha waa in la gooni-yeelaa muddo 14 maalmood ah ka dibna loo soo bandhigo dib u baadhid. Hadday laga waayo dib u baadhis kadib, ama haddii ay diidaan baadhitaan oo ay leeyihiin astaamo, gooni-yeelid looma sii baahnaan doono.
  - LTCF-yada sidoo kale waa inay u diyaarsan yihiin waxyaabaha soo socda:
    - » Haddii qiimeynta xakameynta caabuqa aan la fulinin, ku dar qiimeynta dhaqamada xakameynta caabuqa inta lagu guda jiro baadhitaanka xarunta oo idil.
    - » HCP-ga la heli karo ee oo tababaran ayaa maamulayo baadhitaanada iyadoon loo baahnayn in degganayaasha ay u safraan xarun daryeel caafimaad.
    - » Qaabka loo wajahayo degganayaasha ama HCP=yada diiday ama aan la awoodin in la baaro (tusaale ahaan, degane ama HCP astaamaha leh ee diidan baadhitaan waa in loola dhaqmaa sida inuu qabo)

---

7 Xeelad ku saleysan baadhitaan ayaa laga yaabaa in la doorbido marka laga go'aan gaarayo shaqo ku laabashada shaqsiyaadka laga yaabo inay sii qabaan caabuqa wax ka badan 10 maalmood (tusaale ahaan, si daran difaaca uga dilay). Tixgeli la tashiga caafimaadka bulshada xaaladahan.

8 Kiis qaba COVID-19 shaybaar-oo ay xaqiijisay NAAT (tusaale, baadhitaanka falgalka silsiladda polymerase [PCR]) shaybaar kasta ee si guul leh u xaqiijiyey agabka baadhitaanka CDC; ama labo Shaybaar Loo Sameeyay Baadhitaan ee hoos imanaya Oggolaanshaha Isticmaalka Degdega ah ee FDA (FDA Emergency Use Authorization).

9 Kiis mala ah waa qof aan laheyn natiijo togan oo COVID-19 ah, oo leh xanuun daran oo muujinaya ugu yaraan labo ka mid ah waxyaabaha soo socda: neef yari, qufac, qandho, Ur ama dhadhan la'aan, caddeyn muuqaal raajito ah oo muujinayo oof wareen daran; oo aaney suurtogal ahayn in si kale loo qaato; oo 14 maalmood ka hor intaanu jirrada bilaaban, uu ku noolaa isla guriga ama goob kulmeedka, ama xiriir dhow la lahaa kiis la xaqiijiyay.

Haddii, inta lagu gudajiro cudur dillaaca, LTCF ay awoodo waydo inay sameyso baadhitaan lagu taliyay ee degganayaasha iyo shaqaalaha, waa inay caawimaad codsadaan iyagoo u marayo Maamulka Caafimaadka Dadweynaha Deegaanka si looga caawiyo mid ka mid ah qaybaha soo socda:

- Taageerada Sheybaarka ee OSPHL si loo helo baadhitaanka koowaad ee xarunta oo dhan.
- PPE inay uruuriso muunada oo ay ilaaliso taxadarka ku habboon ee gudbinta.
- Shaqaalaha rugaha caafimaad ee shatiga leh inay qaadaan muunada. Xusuusnow in ay tahay doorbidista in shaqaalaha xarunta ay ka soo qaadaan muunada degganayaasha sababta oo ah waxay kordhin doontaa shido la'aanta deggeneyaasha inta lagu guda jiro qaadista muunada oo waxay kordhineysaa rabitaanka baadhitaanka. HCP-yada yaqaana deganeyaasha ayaa si hufan uga weecan kara arrimaha oggolaanshaha ee adag ee deggeneyaasha aan awoodin inay oggolaadaan baadhidda naftooda, waxayna yareyneysaa halista qaadista dheeraadka ah ee COVID-19 ee kuwa ka imanaya bannaanka xarunta.
- Waxbaridda shaqaalaha iyo deganeyaasha si loo fududeeyo baadhitaanka.
- Taageerada Xakamaynta caabuqa si loo fududeeyo habraacyada baadhista badbaadada leh.

Dhacdada in degane LTCF laga helo COVID-19 inta lagu gudajiro kormeerka joogtada ah ama laga helo baadhitaanka shakhsi astaamaha leh, baaritaanka kiiska, oo uu hogaaminayo Maamulka Caafimaadka Dadweynaha Maxalliga ah oo kaashanaya OHA iyo DHS, ayaa xigi doona si loo hubiyo:

- Xeeladda baadhitaanka ayaa loo hirgalin doonaa sidaan kor ku soo sheegnay.
- Deganeyaasha looga shakisan yahay ama lagu xaqiijiyey COVID-19 waa la gooni-yeelayaa waxaana lagu daryeelayaa qalab ilaalin shaqsiyeed oo idil (go', gacmo-gashi, maasgaro, ilaalada indhaha [OOkiyaalo ama gaashaanka wajiga]) illaa deggeneyuhu buuxiyo shuruudaha joojinta taxaddarradda ku-saleysan gudbinta.
- Degane kasta oo dagane COVID-19 qaba la dagan ama degane kasta oo si macquul gal ula kulmay degganehan (<6 fuudh u dhexeeya ugu yaraan 15 daqiiqo) waxay u baahan doonaan in la gooni-yeelo 14 maalmood
- Haddii deganayaal badan oo qabo COVID-19 la aqoonsado, wadajirka ayaa si munaasib ah loogula fulin shaqaalo la cayimay.
- Haddii baahida gooni-yeelidda iyo karantiilku ay ka badato xaddiga xarunta, deggeneyaasha waxay u baahan doonaan in lagu meeleeyo xarun daryeel oo kale.

Lifaaq A: Xaddiga Baadhitaanka iyo kharashka

Xaddiga Baadhitaanka

Maayo 1, Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) waxay sii deysay Qorsheheeda Xeeladda Baadhitaanka ee COVID-19 ee Oregon. Qorshaha Baadhitaanka wuxuu ku qiyaasey in 15,000 baadhitaan todobaadkii loo baahan doono in la qabto si loo gaaro yoolka Oregon ee raad-raacidda iyo yareynta faafitaanka cudurka iyadoo sidoo kale la taageerayo dib u furitaanka dhaqaalaha Oregon. Oregon waxay ku guuleysatay heerkan baadhitaanka labadii toddobaad ee ugu horreeysay Maajo (Shaxda 1) waxayna rajeyneysaa inay sii waddo heerkaan illaa Juun. Qiyaastaan waxaa ku jira 2,500 baadhitaan todobaadkiiba oo looga jawaabayo cudurrada ka dilaaco LTCF-yada markay abuurmayaan balse looma dhisin ulajeeddada ah inay si firfircoon u baadhto dhammaan deggeneyaasha iyo shaqaalaha dhammaan LTCF-yada shatiyeysan.

Waxa jira saddex hay'adood oo aasaasiga ah oo ah qaybaha baadhitaanka Oregon: Shaybaarka Caafimaadka Dadweynaha ee Gobolka Oregon (OSPHL), isbitaallada, iyo sheybaarada ganacsiga. In kasta oo ay hay'adahani haystaan kaabayaal baadhitaan oo ku filan (sheybaarro, mashiinno baadhitaan, shaqaale, iwm) haddana waxay si ba'an ugu xanniban yihiin helitaanka saadka baadhitaanka (dhacaan-qaadada iyo gaadiidka). Gobollada oo dhami waxay wajahayaan isla arrinta.

Hey'adaha baadhitaanka waxay ka helaan saadkooda baadhitaan laba ilood-dowladda federaalka ah (FEMA) iyo suuqa khaaska ah. Labada iloodba ayaa si isku mid ah waxaa u xannibay yihiin soosaarka xaddidan. FEMA waxay saadka u qaybisaa gobol kasta markay codsadaan, ka dibna gobolka ayaa go'aamiya sida loo qaybinayo saadka ay helaan. OSPHL waxay ka heshaa dhamaan saadkeeda baadhitaanka gobolka. Isbitaaladu waxay ka helaan qaar ka mid ah saadkooga gobolka, laakiin waxay sidoo kale ka iibsadaan sahayda suuqa gaarka loo leeyahay. Shaybaarada ganacsiga ayaa saadkooga oo dhan ka iibsada suuqa gaarka loo leeyahay.

In kasta oo gobolku ogyahay xaddiga saadka baadhitaanka ee ay ka codsatay FEMA, ma oga inta ay dhab ahaan ka heli doonto FEMA waqti kasta. Dhawrkii toddobaad ee la soo dhaafay, gobolka wuxuu dalbanayay sahay ku filan 15,000-25,000 baadhitaan toddobaad kasta. Si kastaba ha noqotee, gobolka wuxuu si joogto ah u helay wax ka yar kalabar qaddarka la codsaday, isagoo ka helaya saad ku filan dowladda federaalka si loogu daboolo baadhitaannada qiyaastii 5,000-10,000 oo qof toddobaad kasta. In kasta oo gobolku awoodi karin inuu la socdo tirada saadka ay ka helaan xarumaha baadhitaanka suuqa gaarka loo leeyahay, gobolku wuxuu la socdaa tirada guud ee baadhitaanka lagu sameeyay dadka ku nool Oregon, taas oo tilmaan ka bixinaysa xaddiga baadhitaanka ee Oregon (eeg Shaxda 1 ee hoose)). Muddadan, tirada guud ee baadhitaanada lagu sameeyay Oregon waxay ahaayeen qiyaastii 9,000-16,000 baadhitaan toddobaadkiiba tan iyo horaantii Abriil (eeg Shaxda 1 ee hoose). In kasta oo tirada baadhitaanada toddobaadkiiba ay kordheen, taasoo muujineysa wanaagsanaanta xagga badeeca wareejinta, way adag tahay in la sii odoroso in aan sii socon doonto kororka toddobaadyada soo socda.

Marka la eego caqabadaha socda ee ku saabsan helitaanka saadka baadhitaanka, OHA waxay dareensan tahay in qeybaha baadhayaasha ee hada u adeegaya gobolka inay si wada jir ah u joogteyn karaan cadad lagu kalsoonaan karo oo ah 17,000 toddobaadkiiba. Haddii saad dheeri ah la helo, markaa jadwalka waqtiga ee la soo jeediyay ee hoose ee lagu baadhayo dhammaan deganayaasha iyo shaqaalaha dhammaan LTCF-yada Oregon waa suuragal in la dardar geliyo, hadba mudnaanta baahiyaha baadhitaanada kale.

Shaxda A-1 Tirada Baadhitaanada COVID-19 toddobaadkii ee Oregon, kahor-2/28 - 5/15/2020 *													
	Kahor-2/28	**2/29-3/6**	**3/7-3/13**	**3/14-3/20**	**3/21-3/28**	**3/28-4/3**	**4/4-4/10**	**4/11-4/17**	**4/18-4/24**	**4/25-5/1**	**5/2-5/8**	**5/9-5/15**	**Wadarta**
Baadhitaanada/ Toddobaadkii	4	134	501	1,526	7,398	7,871	9,790	9,097	9,171	12,684	14,481	16,787	89,444
* Maamulka Caafimaadka Oregon Koobidda baadhitaanka Toddobaadlaha ee COVID-19													

Kharashaadka Baadhitaanka

Kharashyada baadhitaanka dhabta ah ee degganayaasha iyo shaqaalaha waa in ugu horreyn lagu daboolaa caymiska, midkood Medicaid, Medicare ama caymiska gaarka ah. Hase ahaatee, ma caddo in caymiska gaarka ah uu daboolayo baadhitaanada astaamaha leh.
Haddii ay jiraan shaqaale aan caymis ku jirin, kharashaadkaas sidoo kale laga yaabo in aan laga daboolin in kasta oo ay jiraan khayraad kale oo laga heli karo CMS si loogu daboolo kharashyada baadhitaanka ee kuwa aan caymiska ku jirin. DHS waxay heshay $3m si ay u aasaaso sanduuqa dib-u-celinta ee xarumaha LTC si ay dib ugu bixiso xarumaha kharashyada ku baxa baadhitaanada la xariirta shaqaalaha aan laheyn ceymiska.

Iyada oo ku saleysan kharashaadka Shaybaarka Caafimaadka Dadweynaha ee Oregon iyo qiyaasta laga helay baadhitaanada qaybta gaarka loo leeyahay, baadhitaan kasta wuxuu ku kici ku dhawaad $100. Wadarta kharashyada lagu baadhayo dhammaan degganayaasha iyo shaqaalaha xarumaha daryeelka muddada-dheer ee gobolka oo dhan waa qiyaastii $6 milyan. Qiyaasey Qiimaha baadhitaanka shaqsiyaadka aan caymiska laheyn iyo kuwa aynan ka bixin caymiska khaaska ah waxay noqon karaan ku dhawaad 40%, ama $2.4m.

Oregon Health Authority

Waxaad ku heli kartaa dokumintigaan oo bilaash ah luuqado kale, daabacaad balaaran, qoraalka camoolka ama qaabka aad doorbidid.
Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsoha.state.or.us.

OHA 2721 Somali (06/15/2020)